

## Codsiga Washington Apple Health ee loogu talagalay Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn (TSOA)

### Washington Apple Health Application for Tailored Supports for Older Adults (TSOA)

<p><b>Maxaa laga wadaa Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn?</b></p>	<p>Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn waa barnaamij caawiya daryeel bixiyayaasha kuwaas oo u daryeela xubin qoys katirsan si bilaash ama lacag la'aan ah. Sidoo kale waxay bixisaa caawimaad haddii aadan haysanin xubin qoys oo adiga ku caawiya. Adeegaha waxaa kamid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• Daryeel kumeel gaar ah ama cunto guriga la keeno. Daryeelka kumeel gaarka ah waxaa bixin kara qof si uu u siiyo daryeel bixiyaha mudo biririf ah.</li> <li>• Qalab caafimaad iyo alaab la isku daaweeyo, sida kursiga musqusha ama qalabka kaadida aan la ceshan karin, sida xafaayadaha dadka waawayn.</li> <li>• Tababar iyo wax barid, sida Qalab Waxtar leh oo loogu talagalay tababarka Daryeel bixiyayaasha.</li> <li>• Waxyaabo caawin kara daryeel bixiyahaaga, sida latalin caafimaad maskaxda ah ama daaweynta duugista jirka.</li> <li>• Caawimaad baahoyinka daryeelka shakhsiyeed ah haddii aadan haysanin daryeel bixiye qoyska katirsan.</li> </ul>
<p><b>Qofkee qaadan kara Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn?</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Haddii aad tahay qof jira 55 sanno ama ka wayn.</li> <li>• Haddii aad haysatid xubin qoyska katirsan midkaas oo si bilaash ah kuu caawiya, laakiin daryeel bixiyahaaga u baahanyahay caawimaad; ama</li> <li>• Aad u baahantahay caawimaad oona haysanin xubin qoyska katirsan oo kuu caawiya si joogto ah.</li> </ul>
<p><b>Waxaad buuxin kartaa foomkan ama waxaad si toos ah uga codsan kartaa internetka.</b></p>	<p>Si aad uga codsatid si toos ah internetka, gal boggaan internetka ah <a href="http://www.washingtonconnection.org">www.washingtonconnection.org</a>.</p>
<p><b>Macluumaadka aad u baahantahay in aad soo gudbiso: (Haddii aad guursatay, na sii sidoo kale, macluumaadka xaaskaaga/ninkaaga.)</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Lambarka dammaanada bulshada</li> <li>• Taariikhda dhallashada</li> <li>• Xaalada guurka</li> <li>• Xaalada Socdaalka:</li> <li>• Dakhliga</li> <li>• Macluumaadka isha dhaqaalaha (sida baaqiyaha koontada xisaabta bangiga, kaydodka, curaarta, ammaanadaha, koontiyada hawl gabka)</li> </ul>
<p><b>Maxaan u weydiinaa macluumaad tiro badan?</b></p>	<p>Waa in aynu oggaano haddii aad u qalantid iyo haddii kale oo aadan u qalmin. Waxaan ka dhignaa macluumaadkaaga kuwo sir ah sida looga baahanyahay sharciga.</p>
<p><b>Waan buuxiyay codsigayga. Hadda Maxaa dhacaya?</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Iska hubso in aad sixiixdid codsigaaga.</li> <li>• Boosto ugu dir dhinaca: DSHS Home and Community Services – Long Term Care Services PO Box 45826, Olympia, WA 98504-5826; ama</li> <li>• Faakis ugu dir dhinaca lambarkan 1-855-635-8305; ama</li> <li>• Keen xafiiska Adeegaha Jaaliyada iyo Guriga (HCS) deegaankaaga; ama Ka fiiri <a href="http://www.alsa.dshs.wa.gov/Resources/clickmap.htm">http://www.alsa.dshs.wa.gov/Resources/clickmap.htm</a> meelaha si aad u heshid.</li> <li>• Si toos ah uga codso boggaan internetka ah <a href="http://www.washingtonconnection.org">www.washingtonconnection.org</a></li> </ul>
<p><b>Wixii kusaabsan macluumaad dheeri ah:</b></p>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Wac lambarkeena lacag-la'aanta ah 1-855-567-0252</li> <li>• Laxiriir xafiiska Wakaaladaada Goobta ee Deegaanka ee kusaabsan Waynaanta (AAA) kadibna codso in aad la hadashid takhasusle Daryeel bixiye Qoyska ah. Ka raadi xafiiska Wakaaladaada Goobta ee Deegaanka ee kusaabsan Waynaanta halkan: <a href="http://www.waclc.org">www.waclc.org</a></li> <li>• Si aad u heshid xafiiska deegaanka ee Adeegaha Bulshada iyo Guriga ka fiiri <a href="http://www.alsa.dshs.wa.gov/Resources/clickmap.htm">http://www.alsa.dshs.wa.gov/Resources/clickmap.htm</a></li> <li>• Waxaan leenahay Warqad Macluumaad midaas oo kuu sheegaysa waxa kusaabsan Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn iyo barnaamijyo kale. Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn waxaa dhici karta in uusan adiga kugu habboonayn.</li> </ul>

# Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn (TSOA) Xuquuqaha iyo Masuuliyadaha

## Waxaa khasab nagu ah in aynu kuu sheegno macluumaadkan. Haka boodin.

### Xuquuqahaaga (waxa khasab nagu ah):

In aynu kuu sharaxno xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga haddii aad codsatid.

In aynu ku caawino haddii aad qabtid naafo. Waxaan ku sharxaynaa midaan gudaha xeerka. Fiiri WAC 182-503-0120.

Waxaan kugu caawin doonaa in aad akhrisid oona buuxisid foom kasta haddii aad caawimaad u baahatid. Wac Xafiiska Adeegaha Bulshada iyo Guriga ee deegaankaaga. Goobaha waxay ku qoranyihiin boggaan internetka ah:

<http://www.alsa.dshs.wa.gov/Resources/clickmap.htm>

Haddii aad u baahantahay adeegaha turjubaan hadal ama turjubaan warqad, noo soo sheeg. Kaagama qaadanayno wax lacag ah midaasi. Isla markiiba waxaan kuu keenaynaa mid.

In aynu ka dhigno macluumaadkaaga shakhsiyeed kuwo sir ah. Kaliya waxaan la wadaagi doonaa macluumaadkaaga wakaalado gobol ama dowladeed kale si loo oggaado haddii aad u qalantid adeegaha iyo haddii kale oona kuu siino barnaamijka.

In aynu u qaadano go'aanka sida ugu dhakhsiyaha badan ee aynu u awoodno.

Haddii aynu u baahano macluumaad badan, waanu kuu sheegi doonaa. Waxaad haysan doontaa 10 maalmood ee kuwa kalandarka ah si aad noo siiso macluumaadkaasi. Haddii aad codsatid wakhti dheeri ah, waan ku siin doonaa wakhti dheeri ah. Nagu sii macluumaadka 10 maalmood ee kuwa kalandarka ah ama na weydiiso wakhti dheeri ah. Haddii aadan sidaasi samaynin, ma heli doontid barnaamijka Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn.

Waan kugu caawin doonaa haddii aad dhib ku qabtid helida macluumaadka aynu u baahanahay.

Kugu siino go'aan qoran, xaaladaha badankooda, gudaha 45 maalmood.

Khasab kuguma ahan in aad la hadashid baare haddii aynu anaga baaritaan kusamayno kiiskaaga. Adiga khasab kuguma ahan in aad soo gelisid gurigaaga wax baare. In aadan la hadlin qof wax baara ma ahaan doonto mid saamaysa haddii aad helaysid barnaamijka Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn iyo haddii kale.

Ku siino fursad aad ku samaysid rafcaan haddii aadan oggolaanin xadidaada laga sameeyay dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada Caafimaadka midkaas oo saameynaya u qalmiitankaaga aad u qalantid TSOA. Haddii aad codsatid rafcaan, waxaa lagu samayn doonaa jadwal Maamul Dhagaysi ah.

In aynu kuula dhaqano si daacadnimo ah. Midab takoorku waa mid lid ku ah sharciga. Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka waxay u hoggaansamaan sharciyada xuquuqaha rayidka federaalka la dabakhi karo mana ku samaynaayan dadka midab takoor ku salaysan jinsiyada, midabka, asalka dhallashada, da'da, naafada, ama galmo. Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka kama saaraan dadka

ama ulama dhaqmaan si kala duwanaansho ah oo ku salaysan jinsiyada, midab, asal dhallasho, da', naafonimo, ama galmo.

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka sidoo kale waxay u hoggaansamaan sharciyada gobolka la dabakhi karo mana ku sameeyaan dadka midab takoor ku salaysan caqiido, nooc, muujin nooca qofka ama shakhsiyadiisa ah, jihayn galmo, xaalada guur, diin, looga saaray si sharaf leh xaalada ciidan ama halyeeynimo hore, ama isticmaalida hagid eey tababaran ama adeeg xayawaan la siiyo qof naafo qaba.

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka:

- Waxay siiyaan dadka qaba naafada adeego iyo gar-gaaro si ay noogula xiriiraan si wanaagsan, sida:
  - Turjubaano luuqada indhoolayaasha ah oo aqoon u leh
  - Macluumaad qoran oo qaabab kale ah (far waaweyn, dhagaysi, qaabab qoraalo eliktaroonig ah oo la heli karo, iyo qaabab kale)
- Waxay siiyaan adeego luuqad bilaash ah dadka aan luuqadooda aasaasiga ahi ahayn Ingiriisi, sida:
  - Turjubaano aqoon u leh
  - Macluumaad ku qoran luuqado kale

Haddii aad u baahantahay adeegahaan, la xiriir 1-855-567-0252.

Haddii aad aaminsantahay in Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada iyo Maamulka Daryeelka Caafimaadka ay ku guuldaraysteen in ay bixiyaan adeegahaan ama kuu midab takoorreen qaab kale, waxaan fayl cabasho u diri kartaa:

- **DSHS**  
ATTN: Constituent Services  
PO Box 45131  
Olympia, WA 98504-5131  
1-800-737-0617  
Faakis: 1-888-338-7410  
[askdshs@dshs.wa.gov](mailto:askdshs@dshs.wa.gov)
- **HCA Division of Legal Services**  
ATTN: Compliance Officer  
PO Box 42704  
Olympia, WA 98501-2704  
1-855-682-0787  
Faakis: 1-360-507-9234  
[compliance@hca.wa.gov](mailto:compliance@hca.wa.gov)

Waxaad fayl cabasho u samayn kartaa si shakhsi ah ama tooska teleefoonka, boosto, faakis, ama iimayl. Haddii aad u baahantahay in laguugu caawiyo samaynta faylka cabashada, Qaybta Adeegaha ee Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ama Qaybta Adeegaha Sharciyeed ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka ayaa diyaar u ah in ay adiga ku caawiyaan.

Sidoo kale waxaad faylka cabashada xuquuqaha rayidka u diri kartaa Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bani'aadamka Maraykanka, Xafiiska Xuquuqaha Rayidka qaab ilaktaroonig ah halkan <https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf>, ama boosto ama teleefoon halkan:

**U.S. Department of Health and Human Services**

200 Independence Avenue SW  
Room 509F, HHH Building  
Washington, D.C. 20201

1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD).

Foomamka cabasho waxaa laga heli karaa cinwaankan [www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html](http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html).

## Masuuliyadahaaga (waxa khasab kugu ah):

**Haddii laga codsado dhinaca wakaalada**, bixi macluumaad kasta ama caddayn loo baahanyahay si loo go'aansado haddii aad u qalantid iyo haddii kale oo adan u qalmin.

**Lambarka Dammanada Bulshada iyo Daah ka qaadista Xaalada Socdaalka.** Waxaa khasab kugu ah in aad na siisid Lambarkaaga Dammanada Bulshada (SSN) ama lambarka dukumeentiga socdaalka. Waxaynu ugu baahanahay midaan waxay tahay si aynu u go'aansano ama u xadidno haddii aad u qalantid iyo haddii kale oo aadan u qalmin. Waxaan u isticmaalnaa Lambarkaaga Dammanada Bulshada si aynu u xaqiijino shakhsiyadaada, wadanka aad u dhallatay, xaaladaada socdaal, taariikhda dhallashada, iyo haddii aad qabtid ceymis kujirid caafimaad kale iyo haddii aadan qabin. **Lama wadaagayno macluumaadkan Amniga Dalka .**

**Kusoo sheegtid isbedelada sida loogu baahanyahay** xeerarkeena gudaha 30 maalmood ee laga joogo isbedelka. **Akhrisid warqadaada oggolaanshaha si aad u oggaatid waxa ay yihiin isbedelada ay khasab kugu tahay in aad soo sheegtid.**

**Buuxisid cusboonaysiinyada** marka aynu midaasi kaa codsano.

**La shaqaysid shaqaalaha Xaqiijinta Tayada** haddii aynu midaasi ku weydiisano.

## Waxyaabaha ay khasab kugu tahay in aad oggaatid:

**Waxaa jira sharciyo dowladeed iyo gobol** kuwaas oo xukuma sida aynu u hawl gelino codsigaaga. Sidoo kale waxay xukumaan xuquuqahaaga iyo masuuliyadahaaga maadaama aad tahay codsadaaha iyo sidoo kale, haddii aad qaadatid adeegaha barnaamijka Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn. Marka aad codsatid, waxaad oggolaanaysaa in aad raacdid sharciyadaan. Haddii aad qaadatid barnaamijka Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn, waxaad oggolaanaysaa in aad raacdid sharciyada khuseeya.

Sharciga dowlada wuxuu nooga baahanyahay in aynu kugu caawino in aad isdiiwaan gelisid si aad u codaysid haddii aad doonaysid. Waad kala dooran kartaa in aad isdiiwaan gelisid iyo in aadan isdiiwaan gelinin. Go'aankaasi ma ahaan doono mid saameeya go'aankeena kusaabsan adeegaha ama dheefaha. Sidoo kale waxaad isku diiwaan gelin kartaa si aad u codaysid boggaan internetka ah [www.vote.wa.gov](http://www.vote.wa.gov) ama qaadatid foom isdiiwaan gelin adiga oo soo waca 1-800-448-4881.

Xanibaadaha **Qaanuunka Masuuliyada iyo Ceymiska Caafimaadka La qaadi karo (HIPAA)** waxay ka celiyaan Maamulka Daryeelka Caafimaadka HCA iyo Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada in ay kala hadlaan macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan ama kusaabsan xubin kale oo qoyskaaga katirsan qof kale, ay kujirto wakiilka la oggolaaday, aan ka ahayn haddii qofkaasi uu leeyahay awood qareen ama adiga sixiixday foom oggolaansho aad ugu oggolaanayso in macluumaadka la tuso ama daaha looga qaado. Midaan waxaa kamid ah daah ka qaadis macluumaadka caafimaadka maskaxda ah, HIV, AYDHIS, natiijooyin baaritaan Cudurada Galmada la Isaga qaado ah, ama adeego kutiirsanaan kiimiko iyo daaweyn ah.

**Qaanuunka Daryeelka La Awoodo** wuxuu ka celiyaa Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada in ay siiso macluumaadka shakhsiyeed ee qofka lagu oggaado (PII) kuwaas oo adiga kugu saabsan ama kusaabsan xubin kale oo qoyska katirsan qofkale oo aanan loo oggolaanin in uu helo macluumaadkaasi.

Macluumaadka aad siiso **Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada waxay u hoggaansanyihiin xaqiijin ay sameeyaan shaqaalayaal rasmi ah oo dowlada iyo gobolka ka socda ee loogu talagalay ujeedooyin lagu xadidayo u qalmitaankaaga aad u qalantid barnaamijka Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn. Xaqiijinta waxaa kamid noqon kara xiriiro lasocoshoh-ah ee ay sameeyaan shaqaalaha Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada.**

[English] Language assistance services, including interpreters and translation of printed materials, are available free of charge. Call 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Amharic] የቋንቋ አገዛ አገልግሎት፣ አስተርጓሚ እና የሰነድ-ንጥር ገጽ-ገጽ ጨምሮ በነጻ ይገኛል። 1-800-562-3022 (TRS: 711) ይደውሉ።

[Arabic] خدمات المساعدة في اللغات، بما في ذلك المترجمين الفوريين وترجمة المواد المطبوعة، متوفرة مجاناً، اتصل على رقم (TRS: 711) 1-800-562-3022.

[Burmese] ဘာသာပြန်ဆိုသူများနှင့် ထုတ်ပြန်ထားသည့် စာရွက်စာတမ်းများဘာသာပြန်ခြင်းအပါအဝင် ဘာသာစကားအထောက်အကူဆောင်ရွက်မှုများကို အခမဲ့ရရှိနိုင်ပါသည်။ 1-800-562-3022 (TRS: 711) ကိုဖုန်းခေါ်ဆိုပါ။

[Cambodian] សេវាជំនួយភាសា រួមមានទាំងអ្នកបកប្រែផ្ទាល់មាត់ និង ការបកប្រែឯកសារពេញម្ត គឺអាចរកបានដោយឥតគិតថ្លៃ។ ហៅទូរស័ព្ទទៅលេខ 1-800-562-3022 (TRS: 711)។

[Chinese] 免费提供语言协助服务，包括口译员和印制资料翻译。请致电 1-800-562-3022 (TRS: 711)。

[Korean] 통역 서비스와 인쇄 자료 번역을 포함한 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 1-800-562-3022 (TRS: 711)번으로 전화하십시오.

[Laotian] ການບໍລິການຊີວາພາສາ, ລວມທັງບາງບ່ອນຊີວາພາສາ ພ້ອມ ການແປຂອງສາບຕີພິມ, ມີໄວ້ໃຫ້ພວກເຮົາໂດຍບໍ່ຄິດຄ່າ. ໂທຫາເລກ 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Oromo] Tajajilli gargaarsa afaanii, nama afaan hiikuu fi ragaalee maxxanfaman hiikuun, kaffaltii malee ni argattu. 1-800-562-3022 (TRS: 711) irratti bilbilaa.

[Persian] خدمات کمک زبانی، از جمله مترجم شفاهی و ترجمه اسناد و مدارک (مطالب) چاپی، بصورت رایگان ارائه خواهد شد. با شماره 1-800-562-3022 (TRS: 711) تماس بگیرید.

[Punjabi] ਭਾਸ਼ਾ ਸਹਾਇਤਾ ਸੇਵਾਵਾਂ—ਦੁਭਾਸ਼ੀਏ ਅਤੇ ਪ੍ਰਿੰਟ ਕੀਤੀ ਹੋਈ ਸਮੱਗਰੀ ਦੇ ਅੰਨੁਵਾਦ ਸਮੇਤ—ਮੁਫ਼ਤ ਉਪਲੱਬਧ ਹਨ। 1-800-562-3022 (TRS: 711) 'ਤੇ ਕਾਲ ਕਰੋ।

[Romanian] Serviciile de asistență lingvistică, inclusiv cele de interpretariat și de traducere a materialelor imprimate, sunt disponibile gratuit. Apelați 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Russian] Языковая поддержка, в том числе услуги переводчиков и перевод печатных материалов, доступна бесплатно. Позвоните по номеру 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Somali] Adeego caawimaad luuqada ah, ay ku jirto turjubaano afka ah iyo turjumid lagu sameeyo waraaqaha la daabaco, ayaa lagu helayaa lacag la'aan. Wac 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Spanish] Hay servicios de asistencia con idiomas, incluyendo intérpretes y traducción de materiales impresos, disponibles sin costo. Llame al 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Swahili] Huduma za msaada wa lugha, ikiwa ni pamoja na wakalimani na tafsiri ya nyaraka zilizochapishwa, zinapatikana bure bila ya malipo. Piga 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Tagalog] Mga serbisyong tulong sa wika, kabilang ang mga tagapagsalin at pagsasalin ng nakalimbag na mga kagamitan, ay magagamit ng walang bayad. Tumawag sa 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Tigrigna] ተርጓሚንጥር ናይ ዝተጻፉ ማተርያላት ትርጉምን ሓዲሱ ናይ ቋንቋ ሓገዝ ግልጽነት፣ ብዘይ ምንም ክፍሊት ይርከቡ። ብ 1-800-562-3022 (TRS: 711) ደውል።

[Ukrainian] Мовна підтримка, у тому числі послуги перекладачів та переклад друкованих матеріалів, доступна безкоштовно. Зателефонуйте за номером 1-800-562-3022 (TRS: 711).

[Vietnamese] Các dịch vụ trợ giúp ngôn ngữ, bao gồm thông dịch viên và bản dịch tài liệu in, hiện có miễn phí. Gọi 1-800-562-3022 (TRS: 711).

## Codsiga Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn (TSOA)

I. Magaca Codsadaha iyo Macluumaadka Xiriirka			
1. Magaca koowaad Xarafka biloowga magaca dhexe Magaca u dambeeya	2. Lambarka teleefoonka ( )	3. Aqoonsiga Macamiilka (haddii aad garanaysid)	
4. Cinwaanka meesha aad degantahay	Magaalada	Gobolka	FURAHA xaafada
5. Lambarka teleefoonka aasaasiga ah <input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Teleefoonka gacanta <input type="checkbox"/> Fariin ( )	6. Lambarka teleefoonka labbaad <input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Teleefoonka gacanta <input type="checkbox"/> Fariin ( )		
II. Magaca Daryeel bixiyaha iyo Macluumaadka Xiriirka <input type="checkbox"/> Dooro halkan haddii aadan haysanin daryeel bixiye			
7. Magaca daryeel bixiyahaaga	8. Lambarka teleefoonka <input type="checkbox"/> Guriga <input type="checkbox"/> Teleefoonka gacanta <input type="checkbox"/> Fariin ( )		
9. Cinwaanka daryeel bixiyaha	Magaalada	Gobolka	FURAHA xaafada
10. Xiriirka uu kula leeyahay			
III. Macluumaada Wakiilka La ogolaaday			
<p>Wakiilka la oggolaaday waa qof wayn midkaas oo aad u oggolaanayso in uu adiga kugu matalo waxyaabaha kusaabsan codsigaaga. Wakiilkaaga la oggolaaday wuxuu kuu sixiixi karaa oona soo gudbin karaa codsigaaga wuxuuna qaadan karaa warqadaha adiga kugu saabsan ee aynu kuu soo dirno. Ururka sidoo kale wuxuu noqon karaa wakiilkaaga la oggolaaday haddii uu ururku yahay mid adiga masuul kaa ah.</p>			
1. Ma leedahay wakiil la oggolaaday? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
2. Ma doonaysaa wakiilkaaga la oggolaaday in uu qaato warqadaha aynu kuu soo dirno ee kusaabsan codsigaaga? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
3. Ma yahay wakiilkaaga la oggolaaday sidoo kale mid adiga masuul kaa ah? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Haddii ay haa tahay, waa kuma: _____			
4. Ma yahay wakiilkaaga la oggolaaday sidoo kale awoodaada qareenka? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Haddii ay haa tahay, waa kuma: _____			
5. Ma yahay wakiilkaaga la oggolaaday sidoo kale daryeel bixiyahaaga? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
6. Magaca wakiilka la oggolaaday/ururka	7. Lambarka teleefoonka ( )		
8. Cinwaanka Boostada ee Wakiilka La oggolaaday			
IV. Xaalada Guurka			
<input type="checkbox"/> Ma guursan <input type="checkbox"/> Waan guursaday waxaana la noolahay xaaskayga/ninkayga <input type="checkbox"/> Waan guursaday laakiin waan kala noolahay xaaskayga/ninkayga <input type="checkbox"/> Waxaan ku jiraa iskaashi guri la diiwaan geliyay			

HCA 18-008 SM (7/20) Somali



18008

V. Macluumaad Kusaabsan Qoyskaaga (Qor kaliya nafsadaada iyo xaaskaaga/ninkaaga, haddii aad guursatay)								
						Ikhtiyaari ayay u tahay xaaskaaga/ninkaaga haddii uusan codsanaynin barnaamijka Taageerada Gaarka u ah Dadka Waawayn		
Magaca (magaca koowaad, dhexe, dambe)	Nooca: Nin ama Dumar	Siduu qofkaan kuula xiriiraa adiga?	Taariikhda a Dhallashada	Oggoow haddii aad u doonaysid adeegaha qofkaan	Lambarka Dammaanada Bulshada	Oggoow haddii Jinsiyadu	Tahay Maraykan (fiiri hoos)	Magaca qabiilka (khuseeya dadka u dhashay Hindida Maraykanka ah, Dadka u dhashay Alaska)
		Aniga nafsadayda		<input type="checkbox"/>		<input type="checkbox"/>		
		Xaas/Nin		<input type="checkbox"/>		<input type="checkbox"/>		
VI. Macluumaad Guud								
<p>1. Asalkayga dhallasho waa Hispanic ama Latino: <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya <b>Xusuusnoow:</b> Macluumaadka asalka Dhallashada iyo Jinsiyada waa mid iskaada ah.  <b>(Tusaalooyinka Jinsiyada:</b> Caddaan, Madow ama Afrikaan Maraykan ah, Aasiyaan, Asal ahaan u dhashay Hawaiian, Degane Jasiirad Baasifik, Maraykan Hindi ah, Asal ahaan u dhashay Alaska, ama isku jir jinsiyado kale.)</p>								
<p>2. Xaaskayga/Ninkayga ama Aniga waxaynu nahay kafaale shisheeye? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Haddii ay haq tahay, waa kuma qofka idin kafaale qaaday? _____</p>								
<p>3. Waxaan u baahanahay turjubaan. Aniga waxaan ku hadlaa: _____ ama <input type="checkbox"/> sixiix; in loo turjumo waraaqahayga luuqada: _____</p>								
VII. Dakhliga La kasbaday (Soo lifaaq Caddayn – Tusaale ahaan caddaynta mushaarka ama qoraal ka ahaada qofka								
<p><b>Xusuusnoow:</b> Hindida Maraykanka ah/Dadka u dhashay Alaska khasab kuma ahan in ay soo sheegaan dakhli gaar ah, sida waxyaabaha la qaybiyo ee ka ahaada shirkadaha U dhashay Alaska iyo Ammaanadaha Dejinta, hanti lagu hayo ammaanad, iyo lahaansho ilo dabiici ah iyo hagaajino; lacag bixinada ka ahaada kaluumaysi, waxyaabaha lagala soo baxo ilaha dabiiciga ah iyo beeraha la goosto; lacag bixinada ka ahaada lahaansho qalab leh shicaar diini ah oo gaar ah, ruuxeed, dhaqan, ama muhiimada dhaqameed; iyo Maktabka Arimaha Hindiya caawimaada dhaqaaleed ee ardayga.</p>								
1. Waxaan haystaa dakhli ka ahaaday shaqo? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya						Magaca loo shaqeeyaha		
Teleefoonka loo shaqeeyaha		Taariikhda aan bilaabay shaqadaan			Ma tahay shaqadaan shaqo-shakhsiyeed? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
Tirada guud ee lacagta la helay (tirada doolarka kahor jaritaanada)								
\$ _____ kasta: <input type="checkbox"/> Saacad <input type="checkbox"/> Todobaad <input type="checkbox"/> Labbo todobaad <input type="checkbox"/> Labbo jeer bishii <input type="checkbox"/> Bileed								
Saacadood todobaad kasta: _____ Taariikhaha lacag bixinta (tusaale ahaan, 1 <sup>da</sup> iyo 15 <sup>ta</sup> , ama Jimco kasta): _____								
2. Xaaskayga/ninkayga wuxuu haystaa dakhli kasoo galay shaqo? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya						Magaca qofka uu u shaqeeyo xaaska/ninka		
Teleefoonka qofka uu u shaqeeyo xaaska/ninka		Taariikhda xaaska/ninka uu bilaabay shaqadan			Ma tahay shaqadaan shaqo-shakhsiyeed? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
Tirada guud ee lacagta la helay (tirada doolarka kahor jaritaanada)								
\$ _____ kasta: <input type="checkbox"/> Saacad <input type="checkbox"/> Todobaad <input type="checkbox"/> Labbo todobaad <input type="checkbox"/> Labbo jeer bishii <input type="checkbox"/> Bileed								
Saacadood todobaad kasta: _____ Taariikhaha lacag bixinta (tusaale ahaan, 1 <sup>da</sup> iyo 15 <sup>ta</sup> , ama Jimco kasta): _____								

### VIII. Dhammaan Dakhliga Kale (Adiga ama xaaskaaga/ninkaaga)

(Soo lifaaq Caddeyn – Tusaale ahaan, waraaqo abaalmarin, bayaano, dukumeentiyo macaashad)

<b>Tusaalooyinku waa:</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Lacagta hawlgabka</li> <li>Dammaanada Bulshada</li> <li>Dheefaha Shaqo La'aanta ah</li> <li>IRA/401(k)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Faa'idooyinka/dheefaha</li> <li>Shaqada iyo Warshadaha</li> <li>Dheefaha waddada tareenka</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Qandaraasyada waxyaabaha la iibiyo qoraalada biilalka</li> <li>Masruufka xaaska</li> <li>Dakhli qabiileed</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Halyeey hore Maamul (VA) ama Dheefaha Ciidanka</li> <li>Haddiyadaha (taageero kaash ah/kaarar haddiyad)</li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>Dakhliga kirada</li> <li>Ammaanadaha</li> <li>Lacagaha sannadlaha ah</li> </ul>
---------------------------	--	---	---	---	--

Nooca Dakhliga Aan la kasban	Qofkee Qaadanaya Dakhliga	Tirada Guud ee Dakhliga Bilaha ah	Qofkee Qaadanaya Dakhliga	Tirada Guud ee Dakhliga Tirada lacagta
		\$		\$
		\$		\$

### IX. Ilaha dhaqaale (Soo lifaaq Caddayn – Tusaale ahaan, nuqulo kusaabsan qoraalo bangi, dukumeentiyo sharci ama siyaasadaha ceymiska)

Ilaha dhaqaale waxay noqon kartaa wax kasta oo aad leedahay ama iibsatid kuwaas oo la iibin karo, lagu gacansan karo, ama loo bedeli karo lacag caddaan ah ama lacag. Midaan waxaa kamid ah waxyaabo ay hayaan dad kale. Ilaha dhaqaale kamid ma ahan hantida shakhsiyeed sida qalabka guriga, dharka, waxyaabaha shakhsiyeed, ay kujiraan dahabka iyo waxyaabaha la isku qurxiyo.

#### Tusaalooyinka ilaha dhaqaale waa:

- |  |  |  |  |   |
|--|--|--|--|---|
| <ul style="list-style-type: none"> <li>Lacag caddaan ah</li> <li>Koontiyo xisaabeed jeeg/CDs</li> <li>Kaydad/Curaar</li> <li>Lacago la is dhaafsado</li> </ul> | <ul style="list-style-type: none"> <li>Gurigaaga</li> <li>IRA/401K/lacagaha hawl gabka</li> <li>Dhul/waxkale guri</li> </ul> | <ul style="list-style-type: none"> <li>Guri lagu noolyahay</li> <li>Siyaasado ceymis nololeed</li> <li>Lacago kulliyad</li> <li>Guri fasaxeed oo la isla leeyahay</li> </ul> | <ul style="list-style-type: none"> <li>Ammaanado/lacago sannadeed</li> <li>Aasid ballamo</li> <li>Qalab beereed/xoolo la dhaqdo</li> </ul> | <ul style="list-style-type: none"> <li>Qalab dhaqaale</li> <li>Qandaraasyo wax iibin</li> </ul> |
|--|--|--|--|---|

Nooca Isha	Yaa iska Leh	Meesha	Qiimaha	Nooca Isha dhaqaale	Yaa iska Leh	Meesha	Qiimaha
			\$				\$
			\$				\$
			\$				\$

**GAWAARIDA:** Qor wax kasta oo gawaari ah oo aad leedahay ama xaaskaaga/ninkaaga leeyahay. Midaan waxaa kamid ah: baabuur, baabuur waawayn, baabuurta qalabka lagu qaado, doomo, RVs, Isjiido, ama baabuur kale oo motor ku shaqeeya.

Sannadka (tusaale ahaan,	Samaysay (Toyota)	Nooca (Camry)	Fiiri haddii la	Tirada Lacagta La isku
			<input type="checkbox"/>	\$
			<input type="checkbox"/>	\$

### X. U akhri si Taxadar leh Kahor inta aadan Sixiixin

**Xuquuqaha Maamulka Dhagaysiga:** Haddii aadan oggolaan go'aanka aynu qaadanay, waxaad samayn kartaa fayl rafcaan ah oo aad u dirsato dhinaca dhagaysiga. Sidoo kale waxaad codsan kartaa horjooge iyo maamule si uu kuu caawiyo. Weli waxaad haysataa dhagaysi xitaa haddii aad codsatid caawimaadaan.

## XI. Isdiiwaangelinta Codeeyaha

Waxaad waxay bixinaysaa adeegyo diiwaangelin cod-bixin ah, ay kamid tahay isdiiwaan gelin codayn ootamaatik ah.

**Codsashada si la isku diiwaangeliyo ama ka noqoshada diiwaangelinta lagu codeeyo ma ahaan doonto mid saameysa adeegyada ama tirada dheefaha ay dhici karto in aad ka heshid dhinaca wakaaladan.** Haddii aad jeceshahay in laguugu caawiyo buuxinta foomka diiwaangelinta cod bixiyaha, waynu kugu caawin doonaa. Go'aanka ah haddii la raadinayo ama la aqbalayo caawimaada waa mid adiga kugu xiran. Waxaad awoodaa in aad u buuxisid foomka diiwaangelinta codeeyaha si gaar ama khaas ah. Haddii aad aaminsantahay in qof lagu wareejiyay xuquuqahaaga diiwaangelinta ama si looga laabto isku diiwaangelinta lagu codeeyo, xaq aad u leedahay in aad hawlahaaga khaas u noqotid ee ah go'aansashada haddii la isdiiwaangelinayo ama codsashada si la isku diiwaangeliyo in lacodeeyo, ama xaqaaga aad kudooratid xisbigaaga siyaasadeed ama doorasho siyaasadeed kale, waxaad fayl cabasho u diri kartaa dhinaca:

Washington State Elections Office PO Box 40229, Olympia, WA 98504-0229 (1-800-448-4881).

**Ma doonaysaa in aad isku diiwaangelisid si aad u codeysid ama u cusboonaysiisid diiwaangelintaada qofka codeeya?**

Haa  Maya

**Haddii aadan saarin ama dooran midna sanduukhyada, waxaan kuu tixgelin doonaa in aad go'aan kugaartay in aadan isku diiwaangelin in aad codeysid wakhtigan, aan ka ahayn haddii aad u qalantid, oona aadan ka laabanin, isdiiwaangelinta codaynta ootamaatikada ah.**

Aan ka ahayn haddii aad dooratay "Maya" ee kor, waxaa dhici karta in aad u qalantid isdiiwaangelinta codaynta ootamaatikada ah. Adigu waxaad u qalantaa isdiiwaangelinta codaynta ootamaatikada ah haddii aad noqon doontid 18 jir doorashada soo socota, adugu tahay muwaadhin u dhashay Waddanka Maraykanka, oona DSHS ay hayso magacaaga, cinwaankaaga deegaanka iyo boostada, taariikhda dhallashada, xaqiijin ku saabsan macluumaadkaaga muwaadhanimo, iyo sixiixaaga uu sheegayo runta macluumaadka lagu sheegay codsigan.

**Ma doonaysaa in aad ka codaysid isdiiwaangelinta codaynta ootamaatikada ah?**  Haa  Maya

**Haddii aad dooratay khaanada "Haa," ama aadan dooranin midna khaanadaha oodna kasoo baxdid shuruudaha u qalmitaanka isdiiwaangelinta codaynta ootamaatikada ah, DSHS waxay u diri doontaa macluumaadkaaga Xafiiska Wasiirka Arimaha Dibada waxaana si ootamaatik ah laguugu qorayaa codaynta.)**

## XI. Qirasho iyo Sixiixid

Waan akhriyey waana fahmay macluumaadka kujira codsigan. Waxaan ku qirayaa, hoosta ciqaabta been ku dhaarashada hoos timaada sharciyada Gobolka Washington, in macluumaadka aan ku sheegay codsigaan, ay kujirto macluumaadka khuseeya dhallashadayda iyo xaalada socdaal, ay tahay mid run ah, oona sax ah, oona ka turjumaysa inta aan oggahay.

**Sixiixa Codsadaha ama Wakiilka La Oggolaaday**

Taariikhda

Magaca La Qorey ee Codsadaha ama Wakiilka La Oggolaaday